

Dawladdu waxa ay soo rogaysaa tallaaboooyin cusub ee heer qaran ah

Dawladdu waxa ay soo rogaysaa tallaaboooyin kale oo heer qaran ah si loo xakameeyo cudurka safmarka ah. Waxa ugu muhiimsan in dadka ka weyn 65 sano la siiyo irbad xoojin sida ugu dhakhsaha badan.

– Cudurkii safmarka ahaa ma dhammaanin, laakiin waxa uu galay weji cusub. Waa in aynu baranno sidii aynu ula noolaan lahayn cudurka. Maadaama aynu haysano tallaal, waxa bulshadu u adkaysan kartaa is-qaadsiin intii hore ka badan. Waxa la rabaa in laga hortago in isbitaalladu ay buux-dhaafaan iyo in culaysku ka bato goobaha caafimaadka. Haddana islamarkaana waxa la rabaa in dadku u noolaado si caadi ah ilaa intii suuragal ah. Waa in aannu mar kasta isudheelitirno hadafyadaas iyo tallaabooyinka, ayuu yidhi raysalwasaare Jonas Gahr Støre.

Hadda waxa kordhay is-qaadsiinta cudurka. Goobaha caafimaadka iyo daryeelka waxa saaran culays, kuwa degmooyinka iyo isbitaallada ba. Dawladdu waxa ay taas darteed soo rogaysaa tallaaboooyin heer qaran ah si loo xakameeyo xaaladda.

– Dadka qaatay irbad tallaal oo xoojin ah, waxa hoos u dhaca suurtagalmimada in isbitaal la dhigo. Waxa ugu muhiimsan ee hadda la samayn karo, waa in dadku qaataan tallaalka loo fidiyo, ayuu yidhi Støre.

Dawladdu waxa ay soo rogaysaa tallaaboooyin kale oo cusub. Tallaabooyinku waxa ay ka bilaabmayaan 1-da Desember, soo-jeedinaduna waxa ay ka bilaabmayaan hadda. Waxa ay soconayaan ilaa wax-ka-beddel lagu samaynayo, waxaanay ku salaysan yihiin talooyin iyo soo-jeedinno laga helay Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI).

Tallaaboooyin cusub oo heer qaran ah

Waxannu hadda soo rogaynaa labo xeer oo cusub:

- Haddii aad la deggan tahay qof cudurka laga helay, waa inaad gasho karantiil guri, ilaa intaad iska qaadayso tijaabada koroonaha oo cudurka laga waayey (waxa la mid ah dadka aan wada degganayn laakiin si kale isugu dhow, sida lammaane saaxiibtinimo ka dhaxayso). Arrintani waxa ay khuseysaa dadka 18 ka weyn, kuwa tallaalan iyo kuwa kaleba. Haddii aad tallaalan tahay waxaad karantiilkka ka bixi kartaa haddii aad tijaabo iska qaaddo cudurkana lagaa waayo, laakiin waxa waajib ah inaad tijaabo cusub iska qaaddo toddoba maalmo ka dib. Haddii aanad tallaalmayn waxaad karantiilkka ka bixi kartaa haddii aad tijaabo iska qaaddo cudurka lagaa waayo, laakiin waxa waajib ah inaad toddoba maalmo aad maalin kasta iska qaaddo tijaabada degdegga ah ama in aad maalin dhaaf iska qaadid tijaabo PCR ah. Carruurta la deggan qof cudurka laga helay waajib kuma aha in ay tijaabo iska qaadaan, laakiin waa lagula talinaya.
- Haddii covid-19 kugu dhoco, waa in aad dadka gooni uga baxdid muddo 5 maalmo ah. Arrintani kuma xidhna in aad tallaalmayd iyo in kale. Maanta ka hor qofka tallaalan ee aan qabin calaamadaha cudurka waxa laga rabay 2 maalmo. Islamarkaana in aanu 24 sacaadood qabin wax xummad ah ka hor intaanu ka bixin goonida.

Waxannu islamarkaana soo saarnay soo-jeedinno cusub oo heer qaran ah:

- Waxa kale oo la soo saaray soo-jeedin heer qaran ah oo ku saabsan in af-dabool la isticmaalo marka la joogo goobaha caafimaadka iyo daryeelka.
- Dawladdu waxay soo saartay soo-jeedin heer qaran ah oo ku saabsan in af-dabool la isticmaalo marka la raacayo gaadiid dadweyne iyo tagsi, iyo marka la joogo dukaammada iyo suuqyada haddii aan la kala fogaan karin.
- Waxa kale oo aannu sii wadaynaa soo-jeedintii ku saabsanayd in tijaabo laga qaado ardayda joogta meelaha is-qaadsiintu ku soo badanayso ee islamarkaana culays badani ku yimi goobaha caafimaadka iyo daryeelka.
- Dawladdu waxa ay degmooyinka is-qaadsiintu ku soo badanayso ee islamarkaana culays badan ku yimi goobaha caafimaadka iyo daryeelka, ka codsanaysaa in ay ka fekaraan in la kordhiyo in guryaha lagu shaqeeyo.

Tallaabooyinkani waxa ay soo raacayaan [tallaabooyinkii ay dawladdu soo rogtay Isniin 29-kii Nofember](#) ee lagu hakinayay faafidda nooc-fayruuseedka omikron.

– Degmooyinka is-qaadsiintu ku soo badanayso ee islamarkaana culaysku ku sii kordhayo goobahooda caafimaadka iyo daryeelka, waxa wakan in ay ka fekeraan in ay soo rogaan tallaabooyin intan ka sii adag oo degmada u gaar ah. Waxa habboon in degmooyinku ay si heer aag/gobol ah isugu duwaan talaabooyinkooda marka loo baahan yahay, ayay tidhi Ingvild Kjerkol oo ah wasiirka caafimaadka.

Degmooyinka waxa waajib lagaga dhigay in ay dadka u fududeeyaan qaadashada tallaalka

Dawladdu waxa ay degmooyinka ka codsanaysaa in ay dardargeliyaan hawsha tallaalistaa. Waa in degmooyinku ay dadka u fidyaan fursad is tallaalis oo aan shardi ka dhigaynin in qofku balan samaysto marka hore. Waa in ay islamarkaana suuragal noqoto in tallaalka la qaadan karo xilliyada aan ahayn saacadaha xafiisyadu caadi ahaan furan yihiin. Waxa tusaale ahaan la samayn karaa fursado balan-la'aan ah (drop-in) oo furan xilliyada ka baxsan saacadaha shaqada ee caadiga ah, ama in guriga lagu tallaalo.

– Degmooyin badan ayaa hindisay farsamooyin wakan oo dadka u fududaynaya in ay qaataan tallaalka loo fidiyay. Waxa hadda la soo saarayaan xeer-nidaamiye la rabo in lagu xaqiijiyo in tallaalka loo heli karo si fudud ilaa intii suuragal ah. Waxannu islamarkaana samayn doonaa telefoon heer qaran ah oo su'aalaha ku saabsan tallaalka ka jawaabaya kuna jawaabi kara afaf kala duwan, ayay tidhi Ingvild Kjerkol oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Dawladdu waxa ay degmooyinka ka codsatay in ay irbad xoojin ah siiyan dhammaan dadka 45 sano ka weyn, ka dib marka dhammaan dadka 65 sano ka weyn loo fidiyo tallaalka. Islamarkaana dhammaan shaqaalaha adeegyada caafimaadka iyo daryeelka waa in loo fidiyo irbad xoojin ah.

– Tallaabada ugu muhiimsan marka la eego xaaladda maanta ayaa ah in dhammaan dadka 65 sano ka weyn sida ugu dhakhsaha badan loo fidiyo irbad xoojin ah. Waxa ay taasi yaraynaysaa baahida loo qabo in la soo rogo tallaabooyin intan ka sii adag. Tallaalka ayaa ah waxa lagaga baxayo cudurkan safmarka ah, ayay tidhi Ingvild Kjerkol oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Dawladdu waxa ay ku tala jirtaa in booskaha ka hor dhammaan dadka 18 sano ka weyn loo fidiyay irbadda xoojinta ah. Markaa waa in degmooyinku isu diyaariyaan in ay 400 000 qof tallaallaan toddobaad kasta.

Qorshayaasha istaraatijiyyadda iyo heeganka oo wax laga beddelay

Dawladdu waxa ay wax ka beddeshay istaraatijiyyadda iyo qorshaha heeganka ee maaraynta cudurka covid-19.

– Waa istaraatijiyyad keenaysa in heegan wacan lagu jiro islamarkaana oggol in si degdeg ah loo soo rogo tallaabooyin adag si xaaladda safmarku aanay faraha uga bixin. Arrintan waxa macnaheedu yahay in loo baahan yahay in nolosheenu la jaanqaado is-beddelka cudurkan safmarka ah, iyo in laga shaqeeyo in adeegyada caafimaadku aanay buux-dhaafin oo islamarkaana la ilaaliyo dhaqaalaha iyo shaqooyinka, ayuu yidhi raysalwasaare Jonas Gahr Støre.

Hadafka guud ee istaraatijiyyaddu waxa uu hadda yahay in la xakameeyo cudurkan safmarka ah, si aanu u keenin xanuun aad u badan iyo culays xad-dhaaf ah oo ku yimaada adeegyada caafimaadka ee degmooyinka iyo isbitaallada. Waa in carruurta iyo dhallinyarada laga ilaaliyo culaysyada ilaa intii suuragal ah, adeegyada dawladdu waa in ay shaqeeyaan ilaa heer macquul ah, islamarkaana waa in la ilaaliyo dhaqaalaha. Heerka heeganku waxa uu sii ahaan doonaa heerka maanta ilaa iyo dhammaadka Abriil sannadka dambe.